Jamhuuriadda Somaliland
Ururka Qareenada Somaliland (SOLLA) Somaliland Lawyer's Association

Tel: 252 2 302869 Telecom e-mailsomalilandbar_association@yahoo.com

## UJ: BAAQ

Aqoon is waydaarsi ay soo qabanqaabiyeen Ururka qareenada Somaliland (SOLLA), oo ay maalgelisay Dallada Ururada Xuquuqda aadamaha ee Somaliland, aqoon is waydaarsigaas oo ku saabsanaa sidii loo ilaalin lahaa xuquuqaha xaqsoorka garqaadista, oo lagu qabtay huteelka Xaraf 6dii ilaa 7dii June, 2007.

Aqoon is waydaarsigaas oo ay ka soo qayb galeen, hawl wadeeno ka kala socda Golayaasha sharci dejinta, Xukuumada, garsoorka, Ururada xuquuqda aadamaha ee wadaniga ah, Jaamacadaha Dalka, Garyaqaanada iyo Sarkaal Sare oo ka tirsan hay'ada Amnesty International xafiiska dhexe ee New york, gebagebadii kulanka waxaa ka soo baxay baaqan iyo talooyinkan:

⇒ In la adkeeyo ku dhaqanka sharciga
⇒ In kor loo qaado aqoonta sharciga
⇒ In hawlaha Guddiyada Nabadgelyada sharciga dalka lagu soo dabaalo
⇒ In Garsoorku guto doorkiisa sharci ee lagu ilaalinayo xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee Dastuurku dammaanad qaaday, kana qayb qaato la dagaalanka xadhiga sharcidarada ah
⇒ In dadka u xidhan sharcidarada ee guddiyada Nabadgelyada lo ohayo Maxakamad la horgeeyo
⇒ Baabi'inta kaalinta garsoor ee Guddiyada Nabadgelyada
⇒ In xadhiga ay amraan Guddiyada Nabadgelyadu aanu waafaqsanayn dastuurka, shuruucda dalka iyo xeerarka caalamiga ah ee Dastuurku aqoonsaday.

**A L LA H M A H A D L E H**

**Xoghayaha Guud ee Ururka Qareenada Somaliland**
**Garyaqaan Max'ed Saciid Xirsi**